

## Waa maxay Shahaadada Dib U Soo Celinta Fursadda (CROP)?

CROP waa amar maxkamadeed oo madani ah oo laga diiwaangeliyo maxkamadda kaasoo lagu amrayo

- yareynta caqabadaha
- dibna u soo celinayo helitaanka ogolaashaha (leesinka) xirfadaha.

### Ma heli karaa CROP?

CROP waa mid logu talo galay dadka waaweyn iyo caruurta.

Waxaa aad codsan kartaa CROP haddii:

- marka aad si buuxda u dhameysato xabsi lagugu xukumay ama xabsi dhiman ama aad dhameysay mudadii kor kala socoshada ee lagu qabtay.
- aad fulisay dhamaan qodobadii ku xusnaa xukunka
- aad bixisay LFOs (lacagtii lagugu xukumay oo dhan) ama aad raacday qorshihii lacag bixinta ama ay jirto sabab macquul ah oo aadan u raacin qorshihii lacag bixinta.
- aadan la imaan fal dambiyeed cusub
- marna aan lagugu helin:
  - fal dambiyeed culus darajada A
  - fal dambiyeed galmoodka la xiriira
  - fal dambiyeed lagu dhiiri gelinayo galmoodka
  - ka qaadis lacag baad ah
  - isku toogasho wadooyinka ah
  - meelo is taagtaag
- aysan waajib kugu hayen in aad isdiiwaan geliso dadka galmoodka ku daran

## Ka heli karto xog dheeraad ah:

**Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan CROP waxa aad ka heli kartaa bogga internetka ee Adeegga Sharciga ee Kolombiya (Columbia):**

[https://columbialegal.org/policy\\_reforms/crop/](https://columbialegal.org/policy_reforms/crop/)

**Ka daabaco foomamka CROP bogga Maxkamadda ee:**

<https://www.courts.wa.gov/forms/?fa=forms.ms.contribute&formID=102>

### Xagee ayaan ka heli caawinaad?

- Columbia Legal Services, oo kulamo ku qabata gobolka oo dhan
- Soo wac 206-287-8625 si aad balan u sameysato.

### *Kheyraadka*

--

12/2019

## Shahaadada Dib U Soo Celinta Fursadda

Guddiga Nidaamka Isbedelada ee Washington waxa ay u mahadcelinayaan Columbia Legal Services oo bixiyey talo soo jeedintii iyo tixraaca loo baahan yahay ee lagu samleeyey xogsidahan

## Sidee lagu codsadaa Shahaadada Dib U Soo Celinta...

### Talaabada 1aad: Soo qaado foomka Codsiga

Soo qaadoo foomka *Codsiga Dib U Soo Celinta Fursadda* ee bogga internetka ee foomamka maxkamadda(mareegta ka fiirso bogga xiga.)

### Talaabada 2aad: Isku keen oo soo ururi diiwaankaaga

Waa in aad heshaa taariikhadii hore ee fal dambiyeedkaaga

- Codso nuqul ka mid ah taariikh dambiyeedkaaga kana codsada Ciidamada Nabadgelyada ee Washington. <https://fortress.wa.gov/wsp/watch/>
  - Waa in aad keentaa caddeyn muujineysa in aad dhameystirtay waxyaabihii lagu xukumay
  - Waa in aad keentaa caddeyn in aad bixisay ama aad weli bixiso lacagtii lagu xukumay (LFO). Waa in aad maxkamadda u soo bandhigtaa
    - In aad bixisay lacagta oo dhan, ama
    - In aad ku socoto heshiis qorshe lacag bixin ah oo aad ku jirto, ama
    - In aad heysato sabab macquul ah oo aad u bixin weysay LFOs.
- Weydiiso Xogheynta Maxkamadda:
- Cadeyn in aad ka soo baxday xukunkii oo aad bixisay lacagtii lagu xukumay oo dhan, ama
  - Taariikhda dacwadda oo ku cadahay lacagtii aad horey u bixisay.

Haddii ay sabab macquul ah oo aad u bixin weysay maaliyadda lagu xumay (LSO), waa in aad qortaa sababaha aad lacagta u bixin weysay.

### Talaabada 3aad: Ka Diiwaangeli Codsiga Xogheynta Maxkamadda

Ka diiwaangeli codsigaaga **xogheynta maxkamadda sare** ee degmada aad degan tahay ama degmada xukunkaagu ka dhacay ama dambiga lagugu qaaday.

Bixi lacagta diiwaan gelinta. Haddii aadan awoodin in aad bixiso lacagta diiwaan gelinta, waxa aad xogheynta weydiisan kartaa in aad codsato in lagaa daayo oo buuxiso foomka GR34. <https://www.courts.wa.gov/forms/?fa=forms.contribute&formID=87>

### Talaabada 4aad: Wargelinta Xeer Ilaalinta

Waa in aad u dirtaa *Ogeysiiska Diiwaangelinta CROP* xeer xeer ilaalinta degmada aad codsiga ka diiwaan gelisay.

Haddii uu xukunkaaga ka dhacay degmo kale shantii la soo dhaafay gudahooda, waxaaajib kugu ah in aad wargeliso xeerliilinta degmadaas (mooyinkaas).

### Talaabada 5aad: Maxkamadda ayaa go'aan ka gaareysa

Waxaa laga yaabaa in maxkamaddu go'aan ka gaarto iyada oo aan dhageysi loo qaban. Laakiin waxaa suurogal ah in ay dhageysi u qabato su'aalo lagu weydiiyo **Waa in aad tagtaa maxkamadda marka dhageysi lagu balamiyo.**

Haddii ay maxkamadda u cadaato in aad ka soo baxday shuruudihii, waxay soo saareysaa

*Samar iyo Shahaadada Dib U Soo Celinta Fursadda.*

Muxuu ii tarayaa CROP?

1. Ogolaashaha Xirfadaha (Shatiyada) Qofka heysta CROP looma diidi karo ogolaashaha xirfadaha diidmadaas oo sabab looga dhigayo kaliya fal dambiyeed ku jira diiwaankiisa (marka laga reebo xaaladaha qaarkood)
2. Goobaha shaqada iyo mulkiilayaasha guryaha: waxaa laga yaabaa in ay tixgeliyaan CROP, laakiin sharci ahaan khasab kuma aha in ay u hogaansamaan.

### Meelaha aanu saameynta ku laheyn CROP:

1. CROP ma khuseeyo xirfadaha qaarkood:
  - Ciidamada nabadgelyada
  - Ogolaashaha ku shaqeynta sharciga (qareen inaad noqoto)
  - Ogolaashaha ay qeyb ka yihiin mas'uuliyad maaliyadeed ama hawl lagu wakiilanayo arrimo maaliyadeed
  - Ogolaashaha qaarkeed ee la xiriira dadka nugul
  - Ogolaashaha qaarkeed ee la xiriira daryeelka caafimaadka
2. Hay'adaha bixiya ogolaashaha ayaa leh go'aan gaarista:
  - DSHS iyo DOH way diidi karaan ogolaashaha iyaga oo sabab uga dhigaya oo kaliya fal dambiyeed hore, xitaa haddii qofku heysto CROP, laakiin waa KALIYA haddii qofka ay wax ka weydiyaan waxyaabaha ku saabsan:
  - Nooca fald dambiyeedka iyo sida uu khatar u yahay dambiga
  - Mudada ka soo wareegtay tan iyo intii lagu xiray
  - Isbedelka xaaladaha
  - Nooca shaqada/leesinka la doonayo

### Waa maxay waxyaabaha uusan CROP UUSAN ii qaban karin:

1. Saameyn kuma yeelato is diiwaangelinta waajibka ah ee dayac ama xad aad geysatay.
2. In qofka loo soo celiyo ogolaashaha qaadashada hubka
3. Kama saarto (masaxdo) macluumaadka ku saabsan fal dambiyeedka.